



## Caabuqa Pneumokock

Waxa buug-yarahan loogu talagalay qofka raba inuu helo macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan cudurka sambabada/caabuqa sambabada **iyo cudurrada kale ee uu keeno caabuqa pneumokock**, iyo sidoo kale sida kuwaas looga hortago.



## Waa maxay caabuqa pneumokock?

Pneumokocker waxa weeye bakteeriyada dhowr nooc oo xanuun ah carruurta iyo dadka waaweyn labadaba u keeni karta. Pneumokocker waxa weeye sababta ugu badan ee keenta caabuqa sambabada iyo caabuqa dhagaha iyo meningitis-ka. Caabuqa pneumokock waxa uu yeelan karaa dhibaatooyin halis ah wuxuuna u horseedi karaa in cisbitaal la galo iyo waxa ugu daran oo ah in loo dhinto. Waxa jiro in ka badan 100 nooc oo kaladuwan oo pneumokocker ah.

# Sidee ayuu pneumokocker u faafaa?



Waxa bakteeriyada pneumokock laga helaa marinka hawadda, gaar ahaan sanko iyo cunaha. Waxa badanaa bakteeriyadu laga helaa carruurta da'da xanaanada, iyadoo waxoogaa ku badan carruurta dugsiyada. Badanaa ayaanay carruurta bakteeriyada ku xanuunsan.

## **Waxay bakteeriyada pneumokock dadka caafimaadka qaba ama dadka bukaanka ahiba inta badan ugu faaftaa:**

- ▶ Qunfaca
- ▶ Hindhisidda iyo marka la diifsanayo
- ▶ Xiriirka dhow

# Miyaad ka tirsan tahay kooxaha khatar ugu jira?



Xaaladaha caafimaadka qaarkood ayaa daciifin kara habka difaacaaga jidhka kaas oo kor u qaadi kara halista loogu jiro in la qaado caabuqa pneumokock.

Da'da weyn iyo cudurada joogtada ah/daba dheeraada ayaa ah qaar ka mid ah waxyaabaha halista u ah inuu cudur sambabada oo halista ahi kugu dhaco. Waxay sidaas darteed Folkhälsomyndigheten soo jeedinayaan in dhamaan dadka da'doodu 65 jir tahay ama ka weyn, iyo sidoo kale dadka da'doodu tahay 2 sano ama ka weyn ee ka tirsan kooxaha kale ee halista ugu jira inay cudurka pneumokocker iska tallaalaan.

## **Kooxaha khatarta badan ugu jira inay si xun ugu xanuunsadaan caabuqa pneumokock**

- ▶ Dadka da'doodu 65 jir tahay ama ka weyn

### **Dadka xaaladahan qaba:**

- ▶ Xanuunada wadnaha ee joogtada ah
- ▶ Xanuunada keliyaha ee joogtada ah
- ▶ Macaanka
- ▶ Xanuunada sanbabada ee joogtada ah
- ▶ Xanuunada beerka ee joogtada ah
- ▶ Cayilka aadka u badan
- ▶ Xaaladaha kale ee keeni kara in shaqada sanbabku hoos u dhacdo

### **Dadka:**

- ▶ Balwad khamriga leh
- ▶ Balwad daroogada leh
- ▶ Sigaarka caba
- ▶ Alxanlaha

### **Iyo sidoo kale**

- ▶ dadka uu iyaga hore ugu dhacay (uu galay) caabuqa pneumokock

## **Kooxaha iyagu khatarta xun ugu jira inay qaadaan caabuq xun oo pneumokock ah**

- ▶ Dadka leh aspleni/hypospleni (shaqada beeryarada oo hoos u dhacda ama aan beeryarada lahayn)
- ▶ Dadka qaba dheecaan dareeraaya (dareeraha laf dhabarta oo da'aaya) ama dhaawaca soo gaara waxyaalaha dhiigga ka xaniba inuu maskaxda gaadho qaaliin ka dib ama dhaawac madaxa soo gaadha
- ▶ Difaaca jirka oo daciif noqda cudur ama daaweyn darteed
- ▶ Dadka loo galiyay kokleaimplantat (qalabka maqalka oo lagu rakibo dhegta gudaheeda)
- ▶ Dadka qaba cystisk fibros
- ▶ Qofka xubin jirka loo galiyay

# Caqabado ay keento bakteeriyada pneumococcker

## **cudurka sanbabada oo dhiigu sumoobo iyo meningitis-ka macnaheedu yahay in** caabuqa yahay mid jirka galay.

Waxay taasi ka dhigan tahay in pneumococcker ay ku fiday meelo jirka ka mid ah oo aanay caadi ahaan bakteeriyadu galin. Markay taasi dhacdo ayay jiradu badanaa tahay wax halis ah waxayna u baahan tahay daryeel isbitaal.

### ► **Caabuqa sanbabka**

Marka caabuqa sanbabka oo ay keentay pneumococcker ayay qaybo sanbabka ka mid ahi bakteeriyada qabaan. Pneumococcker ayaa ah waxa ugu weyn ee Caabuqa sanbabka keena. Waxa badanaa cudurka qaba carruurta da'doodu ka yar tahay laba sano iyo dadka waa-weyn. Qofka 65 jir ka weyn ama qaba cudur habka difaaca jirka saameeya, ayuu cudurku si gaar ah halis ugu noqon karaa.

### ► **Dhiig sumoobid (sepsis)**

Sepsis waxa weeye marka uu caabuqu ku faafo wareega dhiigga waxayna ka dhigan tahay inuu caabuqu jirka oo dhan saameeyey. Waxay taasi sababi kartaa in xubnaha muhiimka ah ee jirka sida wadnaha, sambabada, maskaxda iyo keliyaha aanay u shaqeyn sidii la rabay.



► **Caabuqa xuubka maskaxda (meningitis-ka)**

Caabuqa xuubka maskaxda, ee sidoo kale loo yaqaan meningitis, waa cudur halis ah laakiin naadir ah. Waxa caabuqa keena infegshan ku dhaca dareeraha iyo xuubka ku wareegsan maskaxda iyo laf dhabarta.



## Sidee ayaad iskaga ilaalin kartaa?

- ▶ Iska ilaali inaanad ku dhawaanin dadka qaba caabuqa.
- ▶ Gacmahaaga dhaq oo isticmaal nadaafadda wanaagsan haddii aad qufacayso, hindhiso leedahay iyo marka aad diifsaneeysid.
- ▶ Iska tallaal si aad u dhinto/yareeyso khatarta caabuqyada halista ah ee ay pneumokocker keento.

Talaalka pneumokocker ee carruurta ayaa tan iyo 2009 lagu daray barnaamijka talaalka ee qaranka. In la helo cudurada ay pneumokocker daran ee carruurta ayaa markaas ka dib hoos ugu dhacay. Tan iyo 2022 ayuu tallaalka caabuqa pneumokocker xitaa sidoo kale lagu daray barnaamijka tallaalka ee gaarka ah ee qaranka ee dadka ka tirsan kooxaha halista ugu jira.



# Sida ayaad iskaga tallaali kartaa pneumokocker

## **Sidee ayaan iskaga tallaalaa pneumokocker?**

Waxa tallaalka pneumokocker lagu sameyn karaa caafimaadka sida vårdcentralen, isbitaal ama tallaal gaar ah oo laga qaato xarun tallaal.

## **Sidee ayuu tallaalku u shaqeeyaa?**

Kalkaaliso ama dhakhtar ayaa tallaalka irbad/saliingo kaaga siin doona muruqa ku yaal cududdaada sare bannaankeeda. Jirkaaga ayaa markaas dabadeed soo saari doona unugyada difaaca jirka, kuwaas oo qayb ka ah habka difaaca jirku ula dagaalamo caabuqyada.

## **Miyaan pneumokocker iska tallaali karaa isla marka aan tallaalada cudurrada kale qaadanaayo?**

Waxaad tallaalka pneumokocker qaadan kartaa isla marka aad tusaale ahaan qaadanaayo, tallaalka hargabka ama tallaalka Covid-19.

## **Qofkee laga tallaalayn pneumokocker?**

- ▶ Qofka si xun uga falceliyay xilli hore oo la tallaalay ayaan la tallaali doonin iyadoo aanad marka hore dhakhtar la xiriirin.
- ▶ Qofka xasaasiyad xun/daran ka qaba tallaal ayay sidoo kale tahay in aan aanad istallaalin.
- ▶ Haduu xanuun dheg dheg ah kugu yimaado qandho badana wato waa in tallaalka dib loo dhigaa.

Dhakhtarkaaga waydii haddii tallaalku kugu habboon yahay.

## **Intee in le'eg ayuu difaaca pneumokocker shaqeynayaa?**

Waxa jira laba nooc oo tallaalka pneumokocker ah. Waxaad heli kartaa hal ama labada nooc ee tallaalka taas oo ku xiran da'daada, haddii hore lagaaga tallaalay pneumokocker ama haddii aad qabto cudur keenaaya inaad ka mid noqoto kooxda khatarta ugu jira. Haddii lagugula taliyo inaad qaadato labada nooc ee tallaalkaba ayaa kuwan lagu siin doonaa laba jeer oo kala duwan.

Dadka qaar ayaa u baahan inay dhowr sano ka dib mar kale istallaalaan. Waxaad marka tallaalka la sameynaayo waydiin kartaa dhakhtarkaaga ama kalkaalisada haddii aad u baahan doonto inaad doos / tallaal kale kale qaadato.

## **Waa imisa kharashka tallaalka pneumokocker?**

Gobollada badankoodu waxay tallaalka pneumokocker dadka 65 jirka ah iyo waxa ka weyn iyo sidoo kale dadka qaba xaaladaha caafimaad qaarkood ku siiyaan bilaash. Soo gal [1177.se](http://1177.se) si aad ugu ogaato waxa gobolkaaga khuseeya.

Ha ka waaban inaad la xiriirto dhakhtarkaaga, kalkaalisada ama cidda ku tallaalaysa haddii aad qabtid wax su'aalo ah ama walaac ah ku saabsan tallaalka pneumokocker.

## **Raadso daryeel cafimad**

La xiriir xarun caafimaad sida vårdcentral ama rugta caafimaadka degdega ee heeganka leh haddii aad u malaynayso inaad cudurka sanbabada ama cudur kale oo halis ah oo ay pneumokocker keento qabtid. Haddii aad calaamado qabto waa inaad marka hore Xarunta Cafimaadka wacdaa.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee tallaalka pneumokocker ku saabsan kala hadal dhakhtarkaaga, kalkaalisadaada ama cidda tallaalka ku siineysa.

Waxaad macluumaad dheeraad ah oo pneumokocker ku saabsan iyo kooxaha khatarta ugu jira ka akhrisan kartaa

**folkhalsomyndigheten.se**

ama Vårdguiden **1177.se**

Iskaangaree QR-koodhka oo macluumaad dheeraad ah

ka akhriso **pneumo.se**



Meesha loogu talagalay tallaalaha shaambadiisa  
ama qoraalkiisa u gaarka eh



msd.se, 08-578 135 00

Copyright © 2024 Merck & Co., Inc., Rahway, NJ, USA and its affiliates. All rights reserved.

SE-PNX-00177 01/2024